



Bogga dugsiga caadiga ah

Sollentuna kommun (degmada Sollentuna) waxay hordhaceysaa bogga dugsiga caadiga ah ee dhammaan dugsiyada degmada iyo dugsiyada barbaarinta. Bogga dugsiga waa qalab casri ah ee shaqada u fududeynayo macalimiinta dugsiga, waaladiinta/masuulada iyo ardayda.

Xiriir wanaagsan

Sida waalid/masuul way sahlanaaneysaa in lala xiriiro dugsiga. Sidoo kale way sahlanaaneysaa in la soo wargeliyo maqnaanshooyinka, qiimeynta jadwalka ama weydii su'aalaha jaheeyaha/macalinka.

Kormeer natijjooyinka dugsiga

Bogga dugsiga wuxuu kuu ogolaanayaa inaad kormeerto shaqada dugsiga canugaaga ee maalin ku maalin, tusaale ahaan shaqada guriga iyo mashaariicda socoto. Waxaad sidoo kale heleysaa warbixinta ku saabsan sida canugaaga u tagayo dugsiga, tusaale ahaan, buundooyinka iyo natijjooyinka dugsiga iyo qiimeynada macalinka.

Hal akoon waalidkiiba/masuulkiiba

Waalid walba/masuulka wuxuu leeyahay akoonkiisa/akoonkeeda gaarka ah. Xitaa haddii aad ku leedahay carruur dhoor ah dugsiyada/dugsiyada barbaarinta, waxaa kaliya oo aad u baahantahay hal akoon oo lagu kormeerayo shaqada/howlaha dugsiga canugaaga ee dhinaca bogga.

Gelitaanka bogga waxaad u baahaneyesa aqbaarta gelitaanka ee dugsiga. Dugsiga wuxuu dooran karaa inuu diro aqbaarahaa gurigaaga ama siisaa sharaxaadaha marka uu jiro kulan dugsiga ah.

Websaydka degamada waxaad ka heleysaa *Logga in (Galida)* ee bogga kore. Riix *Logga in som invånare/vårdnadshavare (U gal sida waalid/masuul)*.

The screenshot shows the top navigation bar of the Sollentuna Kommun website. It includes the logo, the text "SOLLENTUNA KOMMUN", and several menu items: Nyheter & press, Sociala medier, E-tjänster, Logga in (which is circled in red), Nyssna, Kontakt, Karta, and Sök. Below the main menu is a secondary navigation bar with links for Start, Skola & förskola, Bygga, bo & miljö, Omsorg & stöd, Uppleva & göra, Näringsliv & jobb, Trafik & stadsplanering, and Kommun & politik.

Labo wado oo lagu galayo

Waxaa jiro labo wado oo lagu galayo bogga

- Si loo wargeliyo maqnaanshaha, aqri ogeysiimada iyo dib u eegida jadwalka, waa inaad doorataa *enkel inloggning* (gelitaan sahan), tusaale ahaan isticmaal magaca isticmaalahaaga iyo furaha kaliya.
- Si aad u gashid dib u eegida qoran, buundooyinka, iwm. Waxay u baahantahay heer sare ee amniga, iyo caawinta e-ID, tusaale ahaan. BankID.

Buuxi sharaxaadaa xiriirkaaga

Waqtiga ugu horeyso ee aad gashid bogga dugsiga, riix magacaaga, oo kadib riix *Inställningar (Goobaha)*. Ku dar sharaxaada xiriirkaaga sida ciwaanka i-meelkaaga iyo lambarka mobeelka. Tani waa qasab, laakin waxay fududeysaa xiriirkaaga tooska ah ee adiga. Sharaxaada ciwaankaaga waxaa laga soo dajiyaa Skatteverket.

Sida waafaqsan hordhaca *Sekretess (Arimaha gaarka)*, dooro sharaxaada xiriirka ee aad rabtid inaad la wadaagtid waaladiinta kale/masuulada.

Marka aad gashid, waad u badeli kartaa luuqada dalabka iyo shaqooyinka Ingiriis. Waxaad sidoo kale badeli kartaa furahaaga (lagu taliyay).

Caawin

Haddii aad qabtid su'aalo ama aadan hubin sida loo isticmaalo bogga dugsiga, mar walba ku soo dhawow inaad nagala soo xiriirtid dugsiga.